

# Xogta Kaalmada Dhaqaalaha, Daryeelka Samafalka iyo Bixinta Caymiska

## Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha

Qoysas bukaan badan oo aan lahayn caymiska caafimaadka way la yaabaan marka ay ogaadaan in uu ilmohoodu xaq u leeyahay in uu helo kaalmo. Isbitaalka Caruurta Colorado waxa uu kala shaqeeyaa bukaanka iyo qoysaska xaqa u leh inay dalbadaan adeegyada isbitaalka kaalmada dawlada. Haddii bukaanku ama qoysku aanu u qalmin kaalmada dawlada, kooxda Latalinta Dhaqaalaha waxay bixin karaan kaalmo dhaqaale oo nooc qiimo dhimis iyo bixin caymis ah.

Barnaamijka Kaalmada Dhaqaaluhu way wada heli karaan dhamaan bukaanku kuwaas oo aan lahayn caymiska caafimaad oo degana Maraykanka. Waxaanu filaynaa in qoysasku isticmaali doonaa wixii ay haystaan oo dhan kahor inta ayna doonan kaalmo dhaqaale.

Arjiga dalabka barnaamiyo badan oo kaalmo ahi waxa ay shuruud ku xidhaan in uu waafaqsan yahay tilamaamaha dhakhliga saboolnimada federalka kaas oo ku salaysan Heerka Saboolka Federalka (oo laha heli karo [www.childrenscolorado.org](http://www.childrenscolorado.org)). Xaq u yeelashada kaalmada dhaqaale waxay u salaysan tahay xajmiga iyo dakhliga qoyska, iyo da'da cida dalbanaysa.

Fadlan nagalaso hadal (720) 777-7001 si aad ula hadasho Lataliyaha Dhaqaalaha. Waxaanu kaa caawin doonaa inaad dalbato barnaamijyada kaalmada dhaqaale ee jira.

## Barnaamijka Samafalka Isbitaalka Caruurta Colorado

Barnaamijka Samafalka Isbitaalka Caruurta Colorado waxa uu bukaanka iyo qoysaska baahida qada siidaa kaalmo dhaqaale. Go'aanka bixinta daryeelka samafalka ah, badanaa, waxa uu ku samaylan yahay qiimaynta dhakhliga, hantida iyo daynta wakhtiga booqashada, iyo natiijada miisaanka caymis wadareedka qoyska.

Nuqul Shuruudaha Kaalmada Dhaqaale iyo Arjigaba waxaa laga heli karaa iyaga oo online ah ([www.childrenscolorado.org](http://www.childrenscolorado.org)), ama iyada oo lagala soo hadlo Waaxda Lataliyaha Dhaqaalaha 720-777-7001, ama Xafiiskaayaga Lataliyaha Dhaqaale oo ku yaal 13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045 ama Daryeelkaaga Degdega ah iyo Bukaan Socodka Gaarka ah ee Briargate oo ku yaala 4125 Briargate Parkway, Colorado Springs, CO 80920. Nuqulku isaga oo dhawr luuqadood ah ayaa la heli karaa, oo ay kamid yihiin Ingiriisi iyo Isbaanish.

### Waa maxay shuruudaha guudi?

*\*Waxa jira waxyaabo ka reeban*

- U qalmida Medicaid, Caymiska Caafimaadka Caruurta +, Barnaamijka Daryeelka Degdega ah ee Colorado, iyo caymisyada kel ee caafimaadka
- Heerka Saboolnimada Federalka eek a hooseeya 250%, xisaabta xajmiga qoyska, dhakhliga, iyo hantida ay ku shaqaystaan
- In lasoo gudbiyo xogta loo baahdo 365 maalmood guhadood ah oo ka bilaabanta taariikhda maalinta lasoo dalacay biilka ka bixisa ee daryeelka la bixiyay

### Xadiga Kharashka Caadiyan Lasoo Dalaco (AGB)

Isbitaalka Caruurta Colorado waxa uu xadidaa xadiga kharash ee daryeelkii la bixiyay qofka laga qaadayo kaas oo u qalmo Kaalmada Dhaqaale. CHCO waxay isticmaashaa nidaamka dib u jaleecida sida lagu sharaxay shuruudca federalka §501(r) si loogu ogaado AGB.



Children's Hospital Colorado

Affiliated with  
University of Colorado  
Anschutz Medical Campus

13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045 • 800-624-6553 • [childrenscolorado.org](http://childrenscolorado.org)

# Ikhtiyaarada Qorshaha Kharash Bixinta

Kharashyada isbitaalku qaado waxay ku waajibaan dhamaan bukaanka ama ha aqoodaa inay bixiyaan ama qaab kale oo bixinta kharashka ha ahaatee. Isbitaalka Caruurta Colorado waxa uu bixiyaa ikhtiyaaro qorshe kharash bixin oo kala duwan oo bukaanka iyo qoysaska uu u fidiyo. Inkasta oo qorshayaal badani ayna dhaafin 6 bilood, mararka qaar siisaska qaar waa laga yeelaa. Si aad u samaysato qoyshe kharash bixin, fadlan nagalaso xidhiidh (720) 777-6422 si aad ula hadasho wakiilka Adeega Macaamiisha.

*Isbitaalka Caruurta Colorado waxa uu u hogaansan yahay Sharciga Dib u Eegida  
Lagu Sameeyay ee § 25-3-112 iyo 26 CFR 1.501(r)-0 ilaa 26 CFR 1.501(r)-7*



**Children's Hospital Colorado**

Affiliated with  
University of Colorado  
Anschutz Medical Campus

13123 East 16th Avenue, Aurora, CO 80045 • 800-624-6553 • [childrenscolorado.org](http://childrenscolorado.org)